# DAAWADAADA: Metformin ____mg

**<u>Maxaan u qaadanayaa daawadan?</u>** Waxaad leedahay macaan ama waxaad halis ugu jirtaa macan waayo dhiigaaga waxa kujirta xadi badan oo sonkor ah. In dhigaagu yeesho xadi badan oo sonkor ah waxay kugu sababi kartaa wadne xanuun, faalig, kalyo xanuun, ama dhibaatooyin xaga indhaha iyo neerfaha.

**Qaado 1 kiniin ah maalin walba cuntada kadib.**

**Qaado 1 kiniin ah kadib markaad cunto quraacda iyo 1 kiniin ah kadib markaad cunto cashada.**

**Qaado 1 kiniin ah kadib markaad cunto Quraacda, 1 kiniin ah kadib qadada, iyo 1 kadib markaad cunto Cashada maalin walba.**

**<u>Maxaan dareemi doonaa markaan qaato daawadan?</u>** Mararka qaarkood waxaad dareemi kartaaa saamayn ay kugu keento daawadu. Saamayntu waa wax iska caadi ah hadaad dareento. Saamaynta qaar ay leedahay daawada Metformin hadii aanu jidhkaagu horey ula qabsan waxa kamid ah yalaalugo, shuban, calool xanuun, iyo neef.

Saamaynta qaar ma dhacaan badanka lakin haday dhacaan waxay noqon karaan halis. **Wac 911 ama aad qolka gargaarka degdega ah isla markiiba haddii aad isku aragto: finan; barar ku dhaca wajiga, dibnaha, carrabka, ama cunaha; dhibaato xagga neefsashada ah ama neefsashada oo adkaata AMA xiliga lagu jiro jimicsi balaadhan, la waajaho bur bur, daciifnimo ama dareemid daal.**

**<u>Maxaa kale ee aan u baahanay inaan ogaado?</u>**

1. Waa inaad qaadataa daawadan maali kasta xataa hadii aad dareento caadi.
2. Waa inaad dib u soo qaadataa bil walba.
3. Cab biyo badan oo cuntanan haka tagin.
4. Waxaad u baahantahay inaad aragto dhakhtar 3 bilood ba si xadiga sonkorta ee dhiigaaga loo cabiro.
5. Hadii aad booqato xafiiska dhakhtar kale, xarun caafimaad, ama qolka gargaarka degdega ah, u sheeg inaad leedahay dhiig kar oo aad qaadato daawada Metformin.

"Macluumaadka ku jira halkan waxa loogu talo galay kaliya ujeedooyin macluumaad loomana qaadan karo talo khubaro caafimaad ahaan. Markasta weydii talada dhaktarkaaga ama adeeg bixiye daryeel caafimaad oo ku haboon wixii su'aalo aad ka qabtid xaalad caafimaad ama daaweyn."